**Faallo Qoto-dheer:** SDP.F20.02

SOMALI DIALOGUE PLATFORM

05 Sebteembar 2022

# Dib-u-eegis Naqshadda Amniga Qaranka ee 2017

## Talooyin muhiimka ah oo tixgelin mudan

# Hordhac

Tobankii sano ee lasoo dhaafay, waxaa jiray guulo muhiim ah oo laga gaaray geeddi-socodka dowlad-dhisidda Soomaaliya, iyadoo la dhisay dowlad federaal ah kadib markii la ansixiyay Dastuurka Kumeelgaar ah sanadkii 2012. Wixii ka dambeeyay sanadkii 2013, Dowlad-goboleedyo ayaa la dhisay, iyadoo sidoo kale la sameeyay dhowr dib-u-habeyn hay'adeed oo muhiim ah. Sikastaba ha ahaatee, nuglaan ayaa weli ka jirta siyaasadda guud ee Soomaaliya – heshiiska aasaasiga ah ee ' hannaanka dowlad-dhiska' – taasoo caqabad ku noqotay in horumar joogta ah la sameeyo.

Mid kamid ah cilladaha waa maqnaanshaha heshiis amni oo xooggan oo qeexaya qaab-dhismeedka guud iyo qeybinta awoodaha iyo masuuliyadaha laamaha amniga iyadoo la isticmaalayo hannaan federaal ah. Horumar aan badneyn ayaa la sameeyay, gaar ahaan heshiiskii horudhaca ahaa ee horraantii 2017 la galay ee dhexmaray madaxda Dowladda Federaalka iyo Dowlad-goboleedyada ee Naqshadda Amniga Qaranka. Heshiiskaas waxa uu xoogaa kala caddeeyay arrimo ay kamid yihiin tirada iyo qeybinta ciidamada ammaanka iyo talisyada iyo qaab-dhismeedkooda. Habka diyaarinta Naqshadda Amniga Qaranka ayaa lagu dhaleeceeyay maqnaanshaha lahaanshaha Soomaalida iyo jiritaan la'aanta wada-xaajood macno leh oo lagu dhisay heshiiskaas. Kadib isku dayo ay sameeyeen madaxda Dowladda Federaalka ee cusbaa markaas ee lagu doonayay in dib dowladda federaalka loogusoo celiyo awoodda qeybo kamid ah arrimihii looga heshiiyey Naqshadda Amniga Qaranka ee 2017, heshiiskii lama fulin. Taas beddelkeeda, Dowladda Federaalku waxa ay xoogga saartay Qorshaha Kala-guurka Soomaaliya. Qorshahaas waxa uu soo bandhigay istaraatiijiyad ku aaddan jebinta Al-Shabaab iyo dib u qabsashada dhulka uu al-Shabaab maamulo laakiin ma aysan soo jeedin qaab kale oo lagu wajahayo arrimaha aasaasiga u ah heshiiska amniga.

Tani waxay keentay xaalad mugdi oo isbeddel la'aan ah , oo la oran karo way sii xumeysay, amniga. Ciidamada ammaanka ayaa aad ugu kala qeybsan heerarka kala duwan ee dowladda, waxaana ay ku kala aragti duwan yihiin dhinacyada siyaasadda iyo beelaha. Loollanka lagu maamulayo ciidamada amniga ee u dhexeeya kooxo kala duwan ayaa ah mid kamid ah ceebaha ugu waaweyn xiligan ee heshiiska siyaasadda, waxaana uu saameyn weyn ku yeeshay marxaladda Soomaaliya ee colaadaha kadib. Mid kamid ah natiijada ka dhalatay ayaa ah in ay si weyn hoos ugu dhigtay waxtarka ciidamada ammaanka Soomaaliya ee la dagaallanka Al-Shabaab. Tusaale ahaan, Jubaland marka la isku daro awoodda ciidamada dowlad goboleedka iyo kuwa federaalka ah sanadihii ugu dambeeyay waxay u badan tahay in ay ka badnaayeen kuwa Al-Shabaab, laakiin khilaaf siyaasadeed oo jiray dartis, ma suurtagelin in dagaal lagu qaado Al-Shabaab-ka ku sugan Jubaland. Siyaasadeynta iyo kala qeybsanaanta hay'adaha amniga ayaa sidoo kale inta badan horseeda isku dhacyo dhexmara cutubyo kala duwan, gaar ahaan bishii April 2021 oo cutubyo kala duwan oo ka tirsan ciidamada Xoogga Dalka Soomaaliyeed ay dhinacyo kala duwan la kala safteen xilliyadii khilaafka doorashada. Xaaladdan ayaa ah mid walaac gaar ah leh marka loo eego hiigsiga cusub ee Howlgalka Midowga Afrika ee Kumeelgaarka ah ee Soomaaliya (oo qorsheynaya in uu billaabo ka bixitaanka Soomaaliya saddexda sano ee soo socota iyo in uu ka baxo gebi ahaanba Soomaaliya shanta sano ee soo socota. Haddii aan la helin heshiis amni oo waara, bixitaanka ciidamada Midowga Afrika waxay u badan tahay inay gacan ka geysato hoos-u-dhac weyn oo dhanka ammaanka ee qeybo kamid ah dalka.

Si loo sii amba qaado, wada-hadal qaran oo loo dhan yahay – oo ay ka qeyb galayaan madaxda iyo shacabka Soomaaliyeed – waa in lagu gaaraa heshiis ay ciidamada ammaanku awood u yeelanayaan inay sugaan amniga dalka. Marka la eego horumarka laga sameeyay in la gaaro heshiis, Naqshadda Amniga Qaranka ayaa noqon kara meel laga billaabo wada-hadallada laakiin waxay u badan tahay inay u baahan doonto dib-u-eegis, iyadoo fiiro gaar ah loo yeela-

nayo casharradii laga bartay tan iyo markii la ansixiyay heshiiskaas, si loo helo aqbalaad siyaasadeed oo dhab ah. Haddii tan lagu guuleysto, dib-u-eegis lagu sameeyay qorshe istiraatijiyadeed, si wax looga qabto khatarta Al-Shabaab waxay markaa u baahan doontaa in laga wada hadlo lana waafajiyo Naqshadda Amniga Qaranka. In laga wada hadlo arrimahan oo muhiim u ah dadaallada ballaaran ee ku aaddan dib-u-heshiisiinta siyaasadeed ee dalka waxay bad-ineysaa fursadaha guusha.

Si loo taageero wada-hadallo wax-ku-ool ah oo arrintan ku saabsan, faalladan waxay falanqeyneysaa arrimaha la isku hayo ee Naqshadda Amniga Qaranka ee u baahan in laga wada hadlo si loo helo heshiis la isku raacsan yahay oo ku saabsan amniga, iyadoo faalladu soo jeedineyso xalalka suurtagalka ah ee arrimahan. Qormadan waxaa la sameeyay iyadoo lala tashanayo khubaro farsamo oo kala duwan iyo siyaasiyiin kasoo qeyb galay kulamada "F20", oo loo naqshadeeyay in lagu falanqeeyo xalalka arrimaha muranka ka jiro ee siyaas-adda Soomaaliya. Xulashooyinka lagusoo bandhigay faalladan ma aha kuwo dhammays tiran, waxaana loogu talagalay inay bilow u noqdaan wadahadal. Waxaa barbar socda faallooyin kale oo dhowr ah oo ka hadlaya arrimo kale oo la isku hayo ee siyaasadda Soomaaliya, sida awood-qeybsiga iyo maqaamka Muqdisho.

# Xal-u-helidda arrimaha la isku khilaafsan yahay ee Naqshadda Amniga Qaranka ee 2017

Arrimaha la isku khilaafsan yahay ee heshiiskii Naqshadda Amniga Qaranka ee 2017 waa kuwo hoos yimaada qeybaha 'Qeybinta iyo Ka-koobnaanta' iyo Taliska iyo Maamulka'. Go'aannada la xiriira labada qeybood ee kale – "Tirada" iyo "Dhaqaalaha/Maaliyadda" – waxaa saameyn doona go'aannada laga gaaro qeybinta iyo ka-koonbaanta, iyadoo fulinta qorshe kasta uu ku xirnaan doono in la gaaro is-afgarad ku saabsan taliska. Xulashooyinka la xiriira taliska iyo tixgalintooda ayaa marka hore laga wada xaajoonayaa kahor inta aan loo gudbin qeybinta iyo ka-koobnaanta, ugu dambeyntiina dhaqaalaha iyo maaliyadda. Tirooyinka ayaa laga wada hadlayaa inta uu hannaanka wada-hadalka socdo.

Kahor inta aan la falanqeyn arrimahan la isku hayo, waxaa muhiim ah in la ogaado in aanay jirin xog la isku halleyn karo oo la xiriirta awoodda, ka-kobnaanta, kartida iyo heerarka tababarrada, dhaq-dhaqaaqa, qalabeynta, iyo qeybinta ciidamada ka tirsan qeybaha kala duwan ee amniga Soomaaliya – tusaale ahaan, Booliska iyo Daraawiishta, CXD, ciidamada gaarka ah, cutubyada madaxa-banaan, iyo sirdoonka. Mudnaanta koowaad waxaa kamid ah in qiimeyn dhammeystiran laga sameeyo dalka oo dhan. Qiimeyntan waa in ay hogaamisaa hay'ad dowladda federaalka ah oo heysata taageerada iyo ka qeybgalka dowlad-goboleedyada iyo, haddii loo baahdo, taageerada beesha caalamka. Qiimeynta noocan oo kale ah waa in ay tixgeliso heerka hay'adaha siyaasadda ee qeybta ka ah amniga sida sida goleyaasha amniga ee dowlad-goboleedyada, guddiyada baarlamaanka iyo xafiisyada la xiriira ee deeq bixiyeyaasha.

## Taliska

Khilaaf kama jiro dhinacyada siyaasadda iyo amniga ee mabda'a koowaad ee taliska, oo ah in 'Ciidanka Qaranka Soomaaliyeed uu yahay ciidan qaran, Madaxweynaha Dowladda Federaalka Soomaaliyana uu yahay Taliyaha ugu sarreeya'. Khilaaf ayaa ka jira jiritaanka Golaha Amniga Qaranka oo ah gole heer sare ah oo go'aan ka gaara arrimaha amniga, inkastoo dadaallada dib-u-yegleelidda iyo nidaaminta golehaas loo baahan yahay in mudnaanta la siiyo si loo xaqiijiyo inuu noqdo gole la aqoonsan yahay, awood sharcina u leh dhammaan arrimaha kale ah ee ku saabsan hirgelinta Naqshadda Amniga Qaranka.

Sida ku qeexan Naqshadda Amniga Qaranka, Ciidanka Xoogga Dalka waa in uu ka koobnaadaa ugu yaraan 18,000 marka laga reebo ciidamada sida gaarka ah u tababaran ee Danab, halka Booliska Federaalka iyo kuwa Dowlad-goboleedyada – oo ay ku jiraan ciidanka Daraawiishta heer Federaal iyo heer dowlad-goboleed – ay noqon doonaan 32,000. Ciidamada Daraawiishta, kuwa Federaalka iyo kuwa Dowlad-goboleedyada, waxay u badan tahay in ay sii ahaan doonaan kuwo militeri maadaama ay inta badan u shaqeynayaan sida ciidamo ku howlan hawlgallada iyo sidoo kale ilaalinta sharciga iyo kala dambeynta. Xaqiijinta talisyada wax-ku-oolka ah iyo maareynta joogtada ah ee ciidamada militariga ee federaalka iyo ciidamada gaarka ah ee dowlad-goboleedyada waxay u noqon doonaan muhiim dhimista khatarta Al-Shabaab iyo taabagelinta ku dhaqanka sharciga dalka oo dhan. Marka tan la gaaro, amniga waxaa ilaalin kara booliiska. Sida tan loo gaarayo marka la eego Naqshadda Amniga Qaranka waxay ku xirnaan doontaa qeyb ahaan labo arrimood oo muhiim ah: doorka, haddii ay jiraan, Goleyaasha Amniga Dowlad-goboleedyada ee Golaha Amniga Qaranka; iyo magacaabista taliyayaasha qeybaha Ciidamada Xoogga Dalka.

### Goleyaasha Amniga ee Dowlad-Goboleedyada

Dowlad-goboleed kasta hadda wuxuu leeyahay gole lamid ah golaha lagu heshiiyey 2017 ee qeybta ka ah Naqshadda Amniga Qaranka. Sikastaba ha ahaatee, xubnaha goleyaashan, awooddooda, iyo inta ay la'eg tahay la macaamilka iyo xiriirka ay la leeyihiin masuuliyiinta heer federaal ayaa kala duwan. Tani waxay u baahan doontaa tixgelin haddii goleyaasha amniga dowlad-goboleedyadu ay qaadanayaan masuuliyadda koowaad ee amniga dowlad-goboleedyadooda. Qiimeyn waa in lagu sameeyo sida ay hadda u shaqeeyaan goleyaasha amniga dowlad-goboleedyada iyo waxa ay u baahan yihiin kahor inta aan la tixgelin doorkooda mustaqbalka oo ay ka mid noqon karaan:

1. Mudnaan siinta isku-dhafka goleyaasha amniga dowlad-goboleedyada iyo ka dhigista hay'ado wax-ku-ool ah ee uu leeyahay dowlad-goboleed kasta iyo xoojinta hababka wada-shaqeynta Golaha Amniga Qaranka. Tani waxay u baahan doontaa tixgelin taxadir leh oo ku saabsan shakhsiyaadka iyo hay'adaha loo xilsaarayo inay hoggaamiyaan isku-xerka goleyaasha amniga dowlad-goboleedyada iyo Golaha Amniga Qaranka, iyo hubinta kalsoonida hoggaanka siyaasadda iyo amniga ee dowlad-goboleed kasta.

2. Ku biirinta xubno sare oo katirsan goleyaasha amniga dowlad-goboleedyada – oo ay ku jiraan, tusaale ahaan, taliyeyaasha ciidamada Daraawiishta iyo Booliska, Wasiirrada Amniga dowlad-goboleedyada, iwm. – ee Golaha Amniga Qaranka oo la ballaariyay, ugu yaraan si kumeelgaar ah. Sikastaba ha ahaatee, ballaarin weyn oo lagu sameeyo Golaha Amniga Qaranka waxay carqaladeyn kartaa wax-tarka golaha haddii aan si taxadar leh loo tixgelin doorka iyo kala sareynta xubnaha golaha.

3. Dhisidda guddi-hoosaadyo heer dowlad-goboleed ah oo ka kooban saraakiisha sare ee amniga gobollada oo ka hoos shaqeynaya Golaha Amniga Qaranka. Guddi-hoosaadyada waxaa loo xilsaari karaa inay metelaan hoggaanka siyaasadda iyo amniga ee dowlad-goboleed kasta waxayna sidoo kale buuxin karaan doorka farsamo ee fulinta go'aamada Golaha Amniga Qaranka.

### Magacaabista Taliyeyaasha Qeybaha ee Ciidanka Xoogga Dalka

Shuruudaha magacaabista taliyayaasha ciidamada Xoogga Dalka Soomaaliya ayaa wax laga beddelay kadib markii la saxiixay heshiiska amniga. Waxaa la tixgeliyey talooyinka ay soo jeediyeen gudiyada difaaca iyo amniga ee Golaha Shacabka kadib la tashiyo ay la sameeyeen xafiiska Ra'iisul Wasaaraha iyo Wasiirada Gaashaandhiga iyo Amniga. Heshiiskii hore (Abriil 2017) ee Naqshadda Amniga Qaranka waxa uu qeexayey in Taliyaha Ciidanka Xoogga uu kala tashan doono madaxweynayaasha dowlad-goboleedyada magacaabista taliyeyaasha qeybaha kahor inta uusan codsan ansixinta Wasiirka Gaashaandhigga. Balse nuqulka dib loo eegay (June 2017) ee heshiiska ayaa meesha ka saaray doorka Madaxweynaha Dowlad-goboleedka waxaana uu awood u siiyay taliyaha ciidanka difaaca in uu si toos ah magacaabo taliyeyaasha qeybaka kadib la tashiga Wasiirka Gaashaandhigga. Tani waxay ahayd wax-ka-beddel muran badan dhaliyay oo aan taageero ka helin madaxda dowlad-goboleedyada. Bishii Luulyo 2018, isku daygii aan guuleysan ee lagu doonayay in lagu fuliyo go'aankan Jubaland ayaa sii xumeeyay xiriirka horey u xumaa ee u dhexeeyay Dowladda Federaalka iyo Jubaland, taasoo muujineyso muhiimadda ay leedahay in Dowladda Federaalka iyo Dowlad-goboleedyada isku afgartaan arrimahan. Fursadaha wax looga qaban karo arrintan waa cad yihiin:

1. Dib uga qeyb gelinta madaxweynayaasha dowlad-goboleedyada wada-tashiyada ku saabsan magacaabista taliyaha qeybta ee dowlad-goboleedkooda – iyadoo taliyaha ciidanka xoogga uu soo jeedinayo dhowr qof ee uu hoggaamiyaha dowlad-goboleedku ka xulan karo, iyo xoojinta aqbalaadda dowlad-goboleedka ee Naqshadda Amniga Qaran-

ka. Madaxweynayaasha dowlad-goboleedyada waxay u baahan yihiin inay garwaaqsadaan in taliyeyaasha qeybaha ay hoos yimaadaan taliska guud ee ciidanka xoogga, inkastoo walaaca laga yaabo in uu dhamaado haddii madaxweynayaasha dowlad-goboleedyadu ay noqdaan guddoomiyeyaasha golayaasha amniga dowlad-goboleedyadooda. Habkan oo kale wuxuu u baahan doonaa hab-heshiisiineed oo ka yimaada hoggaanka siyaasadda federaalka iyo hay'adaha amniga marka loo eego shantii sano ee lasoo dhaafay.

2. Sii heysashada awoodda iyo madax-bannaanida ciidanka xoogga iyo hoggaanka siyaasadda federaalka ee magacaabista taliyeyaasha qeybaha. Habkaas oo kale waxaa uu waafaqayaa u hoggaansanaanta mabda'a Qodobka 54-aad ee Dastuurka Kumeelgaarka ah ee 2012 ee la xiriira awood qeybsiga. Sikastaba ha ahaatee, tani waxay khatar gelinaysaa xiriirka madaxda dowlad-goboleedyada waxa ayna wiiqeysaa hirgelinta Naqshadda Amniga Qaranka.

## Qeybinta iyo Ka-koobnaanta

Marka loo eego Tirooyinka qeybta hoose ee Naqshadda Amniga Qaranka ee 2017, Ciidanka Xoogga Dalka waa in uu noqdaa ugu yaraan 18,000 marka laga reebo ciidamada Danab, halka Booliska Federaalka iyo kuwa Dowlad-goboleedyada – oo ay ku jiraan ciidanka Daraawiishta ee heer Federaal iyo heer Dowlad-goboleed – ay noqonayaan 32,000. Ciidamada Daraawiishta, kuwa Federaalka iyo kuwa Dowlad-goboleedyadaba, waxay u badan tahay inay sii ahaan doonaan ciidan militari ilaa inta ay inta badan u shaqeynayaan sidii ciidamo howlgallo fuliya (inkastoo CXD ay sidoo kale u badan tahay inay howlgallo gudaha dalka ah fuliyaan, halkii ay ka fulin lahaayeen howlgallo la xiriira khataraha dibadda keliya). Waxay sidoo kale u badan tahay in inta badan Booliiska Soomaaliyeed (heer federaal iyo heer dowlad-goboleedba) la hubeyn doono mustaqbalka dhow. Haddii tirooyinkan la doonayo in la joogteeyo, ka dib bixitaanka ciidamada nabad ilaalinta Midowga Afrika, amniga Soomaaliya wuxuu ku xirnaan doonaa sida wax-ku-oolka ah ee loo qeybiyo loona maareeyo ciidamo ka badan 50,000 oo askari oo hubeysan (oo aan lagu darin ciidamada gaarka ah, ciidamada cirka, iyo ciidamada badda). Si loo gaaro tan waxay u baahan doontaa in la helo is-afgarad laga gaaro arrimo muhiim ah oo ay ku jiraan qeybsiga ciidamada ee dowlad-goboleedyada; ka-koobnaanta iyo qeybinta 32,000 oo Boolis/Daraawiish heer Federaal iyo heer Dowlad-goboleed ah; doorka Daraawiishta ee Booliska heer Federaal iyo heer Dowlad-goboleed; iyo doorka ciidamada sida gaarka ah u tababaran.

### U qeybinta ciidamada CXD ee qeybaha/dowlad-goboleedyada

Dib-u-habeynta qeybaha CXD si ay u waafaqaan xuduudaha dowlad-goboleedyada ayaa inta badan la dhameeyay sanadkii 2018 umana baahna dib-u-eegis degdeg ah. Sikastaba ha ahaatee, qeybsiga ciidamada ee dowlad-goboleedyada/qeybaha waa mid kamid ah arrimaha ugu badan ee la isku hayo, iyadoo taariikhda ay muujineyso in ciidamada qaranka intooda badan ka howlgalaan Muqdisho iyo nawaaxigeeda iyo tiro yar oo si joogta ah uga howlgalay dowlad-goboleedyada ka fog caasimadda (gaar ahaan Puntland iyo Jubaland). Heshiiskii asalka ahaa (Abriil 2017) ee Naqshadda Amniga Qaranka, waxaa la isku raacay in 'hoggaanka CXD iyo madaxda Dowlad-goboleedyada ay ka qeyb qaadan doona dib-u-qeybin kasta oo lagama maarmaan u ah ciidamada'. Nuqulka dib-u-habeynta lagu sameeyay (June 2017) ee soo baxay kadib wadatashiyo uu hormuud ka ahaa ra'iisul wasaarihii hore Xasan Cali Khayre, waxaa meesha laga saaray kaalintii hoggaanka dowlad-goboleedyada, taasoo wiiqday xiriirka ka dhexeeya madaxda dowladda federaalka iyo kuwa dowlad goboleedyada, islamarkaana qeyb ka qaadanaya in aan la dhaqan gelin heshiiska Naqshadda Amniga Qaranka.

In heshiis laga gaaro habka qeybsiga ciidamada XDS waa mid kamid ah howlaha ugu muhiimsan ee dib-usoo-nooleynta Naqshadda Amniga Qaranka iyo xaqiijinta dhaqangelintiisa. Sidoo kale waa mid kamid ah howlaha ugu adag, gaar ahaan marka la eego in la sameeyay cutubyo kala duwan oo cusub, oo u muuqda kuwo madaxbannaan oo ka tirsan CXD shantii sano ee lasoo dhaafay iyo in 5,000 oo kale oo tababar kusoo qaatay Eritrea lagu wado in dib loosoo celiyo. Sikastaba ha ahaatee, waxaa jira habab badan oo suurtagal ah oo lagu wajihi karo qeybinta ciidanka xoogga dalka iyadoo la joogteynayo aqbalaadda madaxweynayaasha dowlad-goboleedyada ee Naqshadda Amniga Qaranla. Hababka waxaa kamid noqon kara:

1. Dib-ugu-laabashada heshiiskii asalka ahaa (Abriil 2017) ee Naqshadda Amniga Qaranka kaasoo siinaya hoggaanka CXD iyo madaxda Dowlad-goboleedyada door mug leh oo ku aaddan qeybsiga ciidamada oo ay weheliyaan saraakiisha kale ee amniga heer federaal. Marka la eego hardanka siyaasadeed ee ku lug leh qeybinta tirada go'an ee shaqaalaha amniga qaranka, hoggaanka Golaha Amniga Qaranka waxa uu u baahan doonaa in uu si wadajir ah u ansixiyo qorshe-qeybsi dhammeystiran si loo helo aqbalaad siyaasadeed. Sidoo kale waxaa loo baahan yahay in tixgelin gaar ah la siiyo gobolka Banaadir.

2. U wareejinta masuuliyadda qeybinta ciidamada Golaha Amniga Qaranka ama guddi-hoosaadka ay khusayso oo ah guddiga cusub ee isku dhafka ciidamada, ama guddiga cusub ee amniga qaranka, iyadoo la hubinayo in uu yahay hab dhammeystiran ee qeybinta ciidamada. Golaha Amniga Qaranka waxa uu u baahan doonaa inuu si wada jir ah u ansixiyo qorshe qeybin dhammeystiran si loo helo aqbalaad siyaasadeed.

3. In si siman loogu qeybiyo ciidamada shanta dowlad-goboleed kadib marka lagu heshiiyo in ciidan ku filan loo qoondeeyo Muqdisho/Banaadir. Tani waa habka ugu toosan ee qeybinta ciidamada, laakiin sidoo kale waxay iska indha tireysaa kala duwanaanshaha tirada dadka ku nool qeybaha/dowlad-goboleedyada, qiimeynta khatarta dowlad-goboleed kasta qajahayo, iyo isbarbardhigga awoodaha Booliska/Daraawiishta Dowlad-goboleedyada.

4. Diyaarinta tirakoob kumeelgaar ah ee ku saleysan sahanka dadweynaha ee ay diyaarisay UNFPA 2014 (iyadoo si taxadar leh loo tixgelinayo dadka ku nool gobollada lagu muransan yahay oo ay ku jiraan Mudug, Sool iyo Sanaag, iyo gobolka Banaadir). Habkan ayaa sidoo kale loo arki karaa mid cadaalad ah, inkastoo, inta uu maqan yahay tirakoob cusub ee dadweynaha, uu ku xirnaan doono aqbalaadda sahanka UNFPA 2014 ee dhammaan hoggaamiyeyaasha dowlad-goboleedyada. Waxay wajihi doontaa caqabado la mid ah xulashada 3-aad ee qiimeynta khatarta iyo awoodaha Booliska/Daraawiishta ee dowlad-goboleed kasta.

5. Diyaarinta tirakoob kumeelgaar ah ee ku saleysan qiyaasta dadweynaha ee ay diyaarisay UNFPA 2014 (ama tirakoob cusub). Waxay u baahan doonaan in la miisaamo iyadoo la raacayo qiimeynta khataraha amniga ee hadda jira iyo/ama awoodaha hadda jira ee ciidamada dowlad-goboleedyada ee uu sameeyay Golaha Amniga Qarabka ama guddi-hoosaadka ay khusayso (oo la kaashanaya saraakiisha amniga ee dowlad-goboleedyada). Habkan waxaa loo tixgelin karaa mid kamid ah dhowr hab oo isku-dhafan iyadoo la adeegsanayo qiyaasaha dadweynaha kadibna dib-u-qeybinta si wadajir ah loo aqbalayo islamarkaana ansixinayaan Golaha Amniga Qaranka iyadoo lagu salaynayo soo bandhigidda qiimeynta dowlad-goboleed kasta.

## Ka-koobnaanta iyo qeybinta 32,000 ee Booliska/ Daraawiishta heer federaal iyo heer dowlad-goboleed

Heshiiskii 2017 ee Naqshadda Amniga Qaranka iyo Qaabka Booliska Cusub ee 2016, kaasoo sidoo kale lagu heshiiyey markii la saxiixayay Heshiiska Amniga, midkoodna kama hadlayo su'aalaha ku saabsan ka-koobnaanta iyo qeybinta 32,000 ee Booliska/araawiishta heer Federaal iyo heer Dowlad Goboleed. Qodobka 13-aad ee Qaabka Booliska Cusub ee ku saabsan 'wada-shaqeynta iyo isku-dubbaridka Booliiska Federaalka iyo dowlad-goboleedyada' waxa uu si gaar ah u sheegayaa inta jeer ee ay kulmayaan hay'adaha kala duwan laakiin ma sheegayo hagitaan ku saabsan sida go'aannada loo gaarayo. Qorshaha Booliska ayaa loo diyaariyey dowlad goboleed kasta waxaana loogu talagalay in lagu sameeyo qiimeyn hordhac ah ee u diyaarsanaanta howlgallo ay sameeyaan ciidamada amniga ee dowlad goboleedyada iyadoo ay la socoto qorshayaasha horumarineed ee ciidamada Booliska Dowlad-goboleedyada dalka oo socon doona ilaa 2027, inkastoo keliya qorshaha booliska dowlad-goboleedka Puntland uu yahay mid faafaahin fiican ka bixinaya ciidamada hadda jira.

Qiimeynta u diyaarsanaanta howlgalka oo gaar ah oo ay hoggaaminayso Wasaaradda Amniga Gudaha ee Federaalka ayaa la qorsheeyay 2018-ka, laakiin qeyb keliya ayay fulisay AMISOM waxayna u badan tahay in uu kumeelgaar yahay. Iyadoo loo marayo Barnaamijka Wadajirka ah ee Booliska, oo loo sameeyay isku xirka deeq-bixiyeyaasha iyo booliiska, USD 50 malyan ayaa loo qoondeeyay u qorista iyo tababaridda 2,500 oo boolis ah ee Galmudug (700), Hirshabeelle (800), Jubaland (600), iyo Koonfur Galbeed (400). Sikastaba ha ahaatee, wax yar ayaa laga og yahay qorshayaasha la doonayo in la sameeyo iyo qeybinta 29,500 boolis ee lagu qorsheeyay Naqshadda Amniga Qaranka ee 2017.

Dib-u-qeybinta Booliska Heer-Goboleed/Darwiish ee dowlad-goboleedyada waxay u badan tahay inay aad u adag tahay marka loo eego in badi ay qorteen oo ay si toos ah ugu adeegaan masuuliyiinta dowlad-goboleedka. Inkastoo qiimeynta la heli karo ee awoodda ciidammada dowlad-goboleedyada ay kala duwan yihiin, haddana waxa ay sidoo kale u badan tahay in dowlad-goboleedyada qaarkood ay horeyba uga shaqeynayeen Boolis/Daraawiish aad uga badan intii ay filanayeen in lagasoo qoondeeyo 32,000 ee boolis oo waddanka oo dhan ah. Iyadoo maskaxda lagu hayo, in ay u badan tahay in ay jiraan in ka badan 32,000 oo boolis ah oo heer federaal iyo heer dowlad-goboleed/Daraawiish ah, xulashooyinka ku saabsan ka koobnaantooda iyo qeybintooda mustaqbalka waxaa kamid noqon kara:

1. Joogteynta 32,000 ee la hiigsanayo iyo in la sameeyo isfaham xubnaha Golaha Amniga Qaranka oo ku saabsan qeybinta habboon iyo xadka ugu sarreeya ee cutubyada gaarka ah ee federaalka iyo dowlad-goboleedyada. Tani waxay sidoo kale ku lug yeelan doontaa isku dayga in la dhaqan geliyo hub ka dhigista shaqaalaha dheeraadka ah ama lagu biirin karo CXD ama ciidamada kale ee amniga.

2. Ka tagidda 32,000 ee la hiigsanayo iyo awoodsiinta dowlad-goboleed kasta si ay u dhisto unugyo Booliis/Daraawiish ah oo madax-bannaan, ku xaddidan keliya awoodda dowlad-goboleed kastaa u leeyahay inuu howlgeliyo si ay u joogteeyaan shaqaalaha ay rabaan. Siyaasado qaran ayaa la diyaarin doonaa iyadoo aqbalaad iyo taageero laga heysto madaxda dowlad goboleedyada si loo maareeyo sida Booliska/Daraawiishta Federaalka ay ula falgalayaan oo ay ula shaqeeynayaan ciidamada heer dowlad goboleed iyadoo tixgelin gaar ah la siinayo gobolka Banaadir.

3. Dib-u-eegis in lagu sameeyo 32,000 ee la hiigsanayo iyadoo Golaha Amniga Qaranka uu ku heshiinayo tirada ugu yar, la joogteyn karo, lana awoodi karo ee Booliiska/Daraawiishta Federaalka iyo Booliiska/Daraawiishta dowlad-goboleed kasta. Siyaasado iyo barnaamijyo qaran ayaa loo diyaarin doonaa si loo xaqiijiyo halbeegyada guud ee tababarka, qalabka, dib-u-tirinta, iwm. ee dhammaan shaqaalaha ku jira ciidanka booliska. Masuuliyi-

inta dowladda federaalka iyo kuwa dowlad-goboleedyada waxay markaas yeelan karaan madax-bannaani (iyo masuuliyad maareynta maaliyadda oo buuxda) ee dhammaan shaqaalaha ka baxdan tiradaas iyadoo tixgelin gaar ah la siinayo gobolka Banaadir.

## Doorka iyo ka koobnaanta Daraawiishta ee Booliska heer Federaal iyo heer Dowlad-goboleed

Farqiga u dhexeeya ciidamada XDS, Daraawiishta, iyo ciidamada booliiska ee ka howlgala goobaha ka baxsan Muqdisho iyo magaalooyinka kale ee waaweyn mar walba ma cadda. Taariikh ahaan, ciidamada daraawiishta waxaa loogu talagalay inay u shaqeeyaan sida boolis guurguura ee ka howlgala meelo ka baxsan magaalooyinka iyo jidadka waaweyn ee saadka waxaana la geyn jiray goobaha looga baahdo iyo marka loo baahdo. Si loo sameeyo farqi cad oo u dhexeeya booliska heer dowlad-goboleed iyo ciidamada daraawiishta, iyo ciidamada daraawiishta iyo kuwa XDS, kadibna loo go'aamiyo sida ciidamada daraawiishta ay ula shaqeeynayaan booliska heer dowlad-goboleed, CXD ayaa mudnaan gaar ah u leh raadinta heshiis la isku raacsan yahay oo ku saabsan qeybinta iyo ka-koobnaanta ciidamada amniga Soomaaliya. Marka la eego in siyaasado loogu talagalay Booliska Darawiishta heer federaal la qorsheeyay balse aan la diyaarin, waxaa sidoo kale muhiim ah in la caddeeyo doorka iyo ujeedada ciidamada Daraawiishta Federaalka iyo sidoo kale Booliska Federaalka iyo CXDS. Xulashooyinka lagu xoojinayo kala soocidda doorka iyo ka koobnaanta ciidamada daraawiishta iyo Booliska heer Dowlad-goboleed iyo CXD waxa kamid noqon kara:

1. Habeynta doorka guurguurka ee ciidamada Daraawiishta ee ku howlan howlgallada weerarrada iyo difaaca ee ka dhanka ah khataraha waaweyn sida Al-Shabaab iyo kooxaha kale ee hubaysan ee aan dowliga ahayn. Tani waxay ka duwan tahay doorka dhaqangelinta sharciga madaniga ah ee joogtada ah ee Booliska heerka Dowlad-goboleed.

2. Ku wareejinta kaalinta Daraawiishta Federaalka ee CXDS iyo/ama Daraawiishta Dowlad-Goboleedyada, ama caddeynta iyo habeynta doorka Daraawiishta Federaalka ee ilaalada xuduudaha qaranka iyo nabad-ilaalinta haddii ay dhacdo isku dhacyo dowlad-goboleedyada ah.

3. In laga dhigo dareeska ciidamada Daraawiishta (Heer Federaal iyo Heer Dowlad-goboleedba) mid si fudud looga sooci karo dareeska ciidanka XDS iyo booliska (Heer Federaal iyo Heer Dowlad-goboleed).

4. Dejinta habab saami qeybsi ee Dowlad-goboleedka ee Daraawiishta iyo Booliska iyadoo lagu saleynayo qiyaasaha dadka deggan magaalooyinka iyo miyiga ee dowlad-goboleed kasta marka loo eego sahanka dadweynaha UNFPA ee 2014 iyadoo ciidamo Daraawiish badan la geynayo dowlad-goboleedyada leh tirada dadka reer miyiga/xoolo dhaqatada badan.

5. Sameynta hababka saamiga la beddeli karo ee Daraawiishta iyo Booliiska iyadoo lagu saleynayo qiimeynta khatarta dowlad-goboleedka wajahayo iyo ciidamada u dhigma ee Booliiska/Daraawiishta ee magaalooyinka/miyiga. Habka noocaan ah wuxuu u baahan doonaa habab cad oo ciidamada Daraawiishta Dowlad-goboleedka loogu wareejinayo Boolis sidoo kalene ciidanka booliska dowlad-goboleedka loogu wareejinayo daraawiish.

Kala soocidda hadda jirta ee aan kala caddeyn ee u dhexeysa Booliska, Daraawiishta, iyo CXD waxay sidoo kale siinaysaa fursad marka la eego ka-koobnaanta iyo qaab-dhismeedka ciidamada ammaanka ee Federaalka iyo kuwa Dowlad-Goboleedyada. Tani waxaa loo isticmaali karaa in lagu xalliyo aragtida laga qabo in qabiilo gaar ah ay ku badan yihiin CXDS, iyo in la xalliyo saamiyada kala duwan ee CXD iyo Booliska/Daraawiishta ee dowlad-goboleedyada oo dhan. Waxaa la fahamsan yahay, tusaale ahaan, in Dowlad-goboleedka Hir-

shabeelle saami ahaan ay ku badan yihiin CXDS balse ay ku yar yihiin ciidamo heer dowlad-goboleed ee Boolis/Daraawiish ah. Xaaladahan oo kale, saamiga ciidanka XDS ee ka howlgala Hirshabeelle waa laga dhigi karaa Daraawiish si loo xaqiijiyo saamiga ku habboon ee CXD iyo Booliska/Daraawiishta. Taa cagsigeeda, Puntland waxaa ku badan ciidamada Booliska/Daraawiishta balse waxa ay metelaaddooda ku yartahay CXD, taasoo muujineysa baahida loo qabo in Daraawiishta Puntland loo beddelo CXD si loo helo is-waafajin.

Isku daygii aan guuleysan ee ahaa in 2,400 oo Daraawiishta Puntland ah lagu daro ciidanka XDS 2017/2018 ayaa muujinaya sida ay u adag tahay isku dhafka iyo qeybinta ciidamada jira, xitaa haddii heshiisyo rasmi ah la galo. Xasilloonida xiriirka ka dhexeeya madaxda federaalka iyo kuwa dowlad goboleedyada waxay u badan tahay inay shardi u tahay in hindisayaashan ay noqdaan kuwo guuleysta mustaqbalka. Qaadashada hab dhameystiran, iyadoo la raacayo khariidad dhameystiran, diyaarsanaan, iyo qiimeyn baahiyaha, oo la isku afgartay in dib-u-qeybinta ciidamada ee dhammaan dowlad-goboleedyada ka dibna la fuliyo si isku mid ah waxay noqon doontaa mid waxtar u leh xoojinta kalsoonida iyo heshiiska madaxda dowlad-goboleedyada marka loo eego in marba dowlad-goboleed laga fuliyo.

## Doorka ciidamada sida gaarka ah u tababaran

Heshiiskii Naqshadda Amniga Qaranka ee 2017 waxa uu dhigayay in 500 oo askari oo Danab ah oo si gaar ah u tababaran laga dhiso dowlad goboleed kasta, kuwaasoo hoos tagaya Taliska Ciidanka Danab ee Balidoogle saldhigiisu yahay. Ilaa 2017, cutubyada Danab waxay ahaayeen ciidamada keliya ee sida gaarka ah u tababaran ee ka howlgala koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya. Ilaa iyo markaas, ciidamo cusub oo si gaar ah u tababaran oo ay kamid yihiin ciidanka Gorgor ee uu Turkigu tababaray iyo Haramcad oo ka tirsan booliiska ayaa la dhisay. Waxaa kaloo loo baahan yahay in la caddeeyo doorka cutubyada sida tooska ah ugu warbixiya hay'adda NISA, iyo guud ahaan doorka iyo sharciyadda NISA ku leedahay qaab-dhismeedka amniga.

U isticmaalka cutubyada sida gaarka ah u tababaran ujeeddooyin siyaasadeed tan iyo 2017 ayaa sii kordhisay khilaafaadyada waxayna gacan ka geysatay burburka xiriirka dowladda federaalka iyo qaar kamid ah madaxda dowlad-goboleedyada. Sidoo kale, Puntland dagaalladii u dambeeyay ee u dhexeeyay ciidamada daraawiishta iyo kuwa uu Maraykanku u tababaray Puntland waxay muujinaysaa baahida loo qabo in madaxda dowladda federaalka iyo kuwa dowlad-goboleedyada ay is afgarad ka gaaraan kaalinta, awoodda, halka ay ku sugnaanayaan, taliska, iyo howlgallada cutubyada gaarka u tababaran. Fursadaha suurtagalka ah ee wax looga qaban karo caqabadahan waxaa kamid noqon kara:

1. In la caddeeyo farqiga u dhexeeya ujeedada, waajibaadka, iyo taliska ciidamada Danab iyo Gorgor.

2. Isku dhafka ciidamada Danab iyo Gorgor iyo in dib loogu noqdo ama la waafajiyo soo jeedintii 2017 ee ahayd in 500 oo askari oo gaar ah loo sameeyo dowlad-goboleed kasta iyadoo ay taageerayaan madaxda dowlad goboleedyada iyo taliyeyaasha qeybaha.

3. Dib u howlgelinta ciidamada Danab ama Gorgor si ay u taageeraan tababaridda cutubyo ka tirsan ciidamada XDS iyo kuwa daraawiishta ee dowlad-goboleedyada.

4. Heshiis in laga gaaro baahida loo qabo is-afgarad dhexmara dowladda federaalka iyo madaxda dawlad-goboleedyada ay khusayso ee u daabulidda ciidamadan ee dowlad-goboleedyada.

5. In la caddeeyo doorka iyo ujeeddada Haram'ad, iyagoo laga dhigi karo unug guurguura (sida Daraawiishta) oo ka tirsan Booliska Federaalka.

6. Heshiis uu gaaro Golaha Amniga Qaranka oo ku saabsan howlgallada ciidamada gaarka ah iyo joojinta howlgallada ciidamadaas marka uu jiro khilaaf u dhexeeya dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyada, ama dowlad-goboleedyada dhexdooda.

### Guddiga Is-dhexgalka/Amniga Qaranka

Heshiiska Naqshadda Amniga Qaranka ee 2017 waxa uu farayay in la dhiso Guddiga Isku-dhafka Qaranka si loo xaqiijiyo in ciidamada amniga qaranka Soomaaliyeed ay metelaan Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo dhan. Guddiga ayaa la sameeyay 2015 inkastoo markii dambe laga tagay. Qorshaha Horumarinta Qaranka ee 2020-2024 oo ay soo diyaarisay Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga, iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya ayaa ku baaqaya in dib loo yagleelo Guddiga Isku-dhafka Qaranka iyadoo la raacayo mudnaanta Wasaaradda Gaashaandhigga, inkastoo aan weli la dhisin guddi shaqeynaya. Dastuurka Kumeelgaarka ah ee 2012 wuxuu farayaa in la sameeyo Guddiga Amniga Qaranka oo aan weli la dhisin. Waajibka lasoo jeediyay ee Guddiga Amniga Qaranka waa in la horumariyo qaab-dhismeed amni oo isku dhafan si wax looga qabto baahiyaha hadda jira iyo kuwa mustaqbalka ee dalka, ka dibna la taageero hirgelinta qaabkaas iyo hubinta kormeerka rayidka, oo ay ku jiraan arrimaha la xiriira kharashaadka amniga. Xulashooyinka lagu xoojin karo hirgelinta Naqshadda Amniga Qaranka iyo taageeridda shaqada Guddiga Amniga Qaranka ee suurtagalka ah waxaa kamid ah:

1. Dhisidda Guddiga Isku-dhafka Qaran ee loo dhan yahay, heysta dhaqaale ku filan iyo waajibaad leh wakhti xaddidan si uu gacan uga geysto fududeynta dib-u-qeybinta ciidamada. Waxa uu guddiga u adeegi doonaa sidii xogheyn/guddi-farsamo ee Golaha Amniga Qaranka oo qaadanaya doona go'aan kasta.

2. Sameynta Guddiga Amniga Qaranka si waafaqsan Dastuurka kumeelgaarka ah ee 2012 iyo ballaarinta waajibaadkiisa si loogu daro howlaha loo xilsaaray Guddiga Isku-dhafka Qaran ee Naqshadda Amniga Qaranka ee 2017, iyo sidoo kale taageeridda Golaha Amniga Qaranka.

3. Sameynta Guddiga Isku-dhafka Qaranka iyo Guddiga Amniga Qaranka labadaba, mid walbana si cad u leh waajibaadyo kala duwan, iyadoo Guddiga Isku-dhafka Qaranka uu u adeegayo sidii guddi la-talin madax-bannaan oo waqti xaddidan leh halka Guddiga Amniga Qaranka uu taageero joogto ah siinayo Golaha Amniga Qaranka.

4. U xilsaaridda Guddiga Isku-dhafka Qaranka ama Guddiga Amniga Qaranka in ay si faafaahsan u sameeyaan khariideynta awoodda hadda jirta, diyaarsanaanta, iyo baahiyaha marka la dhiso.

## Dhaqaalaha/Maaliyadda

Mabda'a ah in dowladda federaalka ay masuul ka tahay maaliyadda Ciidanka XDS iyo Booliiska Federaalka, halka dowlad-goboleedyadana ay masuul ka yihiin maaliyadda Booliiska Heer Dowlad-goboleed iyo Daraawiishta waa mid wanaagsan lana wada aqbalsan yahay. Dowlad-goboleedyada heysta ciidamo ammaan oo heer dowladeed ah oo shaqeeya (sidoo kalena heli kara dhaqaale ay u madax bannaan yihiin) – gaar ahaan Jubaland iyo Puntland – waxay masuuliyaddaas qaadanayeen muddo dheer, halka kuwa kale – gaar ahaan Hirshabeelle – ay la halgamayeen sidii ay u joogteyn lahaayeen ciidamo heer dowlad-goboleed ah. Wax ka qabashada daldaloolooyinkan waxay u baahan

tahay in isfaham laga gaaro arrinta federaaleynta maaliyadda. Nooca federaaleynta maaliyadda ee Soomaaliya wuxuu u baahan doonaa inuu ka tarjumo qaab-dhismeedka amniga si loo xaqiijiyo ciidamo amni oo la awoodi karo.

Waxa kale oo muhiim ah in la ogaado in inkastoo aanay jirin xog rasmi ah oo lagu kalsoonaan karo, haddana tirada guud ee shaqaalaha laamaha ammaanku ee ka kooban qeybaha kala duwani ay u badan tahay in ay aad uga badan yihiin kuwa la saadaalinayo oo ay noqon doonaan kuwo aan sii jiri karin oo aan la awoodi karin iyadoo aan la helin taageero dibadeed oo muhiim ah, ugu yaraan mustaqbalka dhaw. Marka la eego horumarrada la sameeyay tan iyo markii Bangiga Adduunka uu dhammaystiray Dib-u-eegista Kharashka Dowladda ee Amniga iyo Caddaaladda bishii Janaayo 2017, dib-u-qiimeynta awoodda laamaha amniga Soomaaliya, oo ay qeyb ka yihiin wasaaradaha Maaliyadda, Gaashaandhigga iyo Amniga Gudaha ee Federaalka waxay u badan tahay inay sii xoojin doonto fursadaha hirgelinta Naqshad Amni Qaran oo cusub, inkastoo howlahaas oo kale laga yaabo inay sidoo kale ka dhashaan natiijooyin siyaasadeed oo aan lagu wada qancin. Waxa kale oo tixgelin mudan in dib loogu noqdo doodaha ku saabsan ansixinta iyo dhaqangelinta Xeer Lr. 6 ee soo baxay 31-kii December 1969-kii ee lagu maamulayey howl-gabka iyo gunnooyinka Ciidammada Qalabka Sida iyo Adeegga Amniga ee uu Golaha Shacabku ansixiyey 30-kii December 2018. Tixgelin dheeraad ah ayaa sidoo kale loo baahan karaa in la siiyo siyaasado la xiriira hub ka dhigis wax-ku-ool ah, ka saarid, iyo dib-u-dhexgalka.

### Taageerada deeq-bixiyeyaasha

Marka la eego taageerada deeq-bixiyeyaasha, waxaa jira fursado lagu xoojinayo isku-dubbaridka iyo in si wanaagsan loo fududeeyo qeybin dheeli tiran ee ciidamada heer federaal iyo heer dowlad-goboleed, sida lagu qeexay Naqshadda Amniga Qaranka ee 2017. Taageerada caalamiga ah ee hay'adaha amniga ee Soomaaliya, oo ay ku jiraan tababbarka, ayaa ahaa kuwo aan mideysneyn tan iyo sanadkii 2017, inkastoo ay deeq-bixiyeyaashu ballan-qaadyo ka sameeyeen in ay hormariyaan isku-duwidda. Tani waxaa, ugu yaraan qeyb ahaan, lagu macnayn karaa ka-tagidda hoggaanka federaalka iyo dowlad-goboleedyada ee ballanqaadyadoodii fulinta Naqshadda Amniga Qaranka. Labada nuqul ee Naqshadda Amniga Qaranka waxay ugu baaqeen maamullada Soomaaliya inay diyaariyaan miisaaniyad amni oo dhameystiran iyo qorshe dib loogu habeynayo ciidamada amniga iyo horumarinta, mushaaraadka, qalabka, daryeelka caafimaadka, tababarada, iyo kaabayaasha — taasoo dhameystirkeeda mudnaanta koowaad la siinayo haddii madaxda dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyada codsadaan taageero isku xiran oo dheeri ah oo la siiyo hay'adaha amniga.

Marka laga reebo taageero iyo barnaamijyo labo-geesood ah, habka maaliyadeed ee ee hadda jira ee lagu taageero amniga Soomaaliya waa Sanduuqa Amaanada ee Qaramada Midoobay oo ay maamusho UNSOS. Hay'adda waxaa markii hore loo aasaasay in ay noqoto xafiis Qaramada Midoobay katirsan oo taageera howlgalka Midowga Africa, islamarkaana lahaa waajibaad cayiman iyo howlo uu xafiiska taageeri karo. Sanduuqa Amaanada ee Qaramada Midoobay ayaa ah mid aan u diyaarsaneyn in uu taageero buuxda u fidiyo hay'adaha ammaanka ee Soomaaliya, iyadoo ciidamada nabad ilaalinta Midowga Afrika ay isku diyaarinayaan ka bixitaan. Sidaas darteed, fursadaha dib-u-eegista taageerada dibadda ee hay'adaha amniga Soomaaliya waxaa kamid noqon kara:

1. Sameynta sanduuq ay Soomaalidu maamusho, iyadoo la sii wadayo deeqaha oo lagu xerayo guulaha la taaban karo ee wakhtiyeysan iyo shuruudaha lagula heshiiyey deeq-bixiyeyaasha — oo ay ku jiraan, tusaale ahaan, nidaaminta iyo shirar joogto ah oo ay yeeshaan Golaha Amniga Qaranka; sameynta Guddiga Isku-dhafka Qaran iyo/ama Guddiga Amniga Qaranka; dhameystirka khariideynta lagama maarmaanka ah, iyo qiimeynta diyaargarowga iyo baahiyaha; hirgelinta qorshayaasha dib-u-qeybinta;

dhameystirka qorshaha istiraatijiyadeed ee dib loo eegay, bixinta mushaarka joogtada ah; xoojinta daahfurnaanta iyo isla xisaabtanka; dhameystirka iyo wadaagga xisaab-xirka joogtada ah; dhisidda hay'ado kormeer rayid ah, iwm. — si ay u noqoto dhiirigelin xooggan oo ay hoggaamiyeyaasha dowladda federaalka iyo kuwa dowlad-goboleedyada ku cusbooneysiiyaan ballanqaadkooda ku aaddan xaqiijinta Naqshad Amni Qaran oo dhameystiran.

2. Isticmaalka sanduuqaas lacagaha amniga si uu u daboolo qeyb kamid ah dhammaan kharashaadka ku baxaya joogteynta labada ciidan ee Milateriga Federaalka iyo Booliska/Daraawiishta Dowlad-goboleedyada. Tani waxaa lagu saleyn doonaa in dowladda federaalka iyo dowlad-goboleedyada midna uusan u isticmaalin dhaqaalahooda si ay usii xoojiyaan awoodda ciidamadooda si ka baxsan xadka uu ku heshiiyey Golaha Amniga Qaranka iyo saaxiibada dibadda ee lacagta ku biirinaya sanduuqa noocaas ah.

3. Ku dhiirigelinta saaxiibbada hadda maalgelinaya joogitaanka ciidamada nabad ilaalinta Midowga Afrika in ay go'aansadaan in ay qeyb ahaan lacagaha ugasoo haraya ciidamada Midowga Afrika ee laga saarayo Soomaaliya ku shubaan sanduuqa amniga Soomaaliya. Tani waa in ay ku dhiirigeliso madaxda dowladda federaalka iyo kuwa dowlad-goboleedyada in ay isu diyaariyaan in ay si buuxda ula wareegaan masuuliyadda amniga dalka iyo in la xaqiijiyo in la sii wado lana sii xoojiyo kadib marka si buuxda ciidamada u baxaan.

4. Heshiis in laga gaaro halbeegyada loo adeegsanayo kaalmada labageesoodka ah ee laamaha amniga ee ka baxsan sanduuqa amniga ee ay Soomaalidu maamusho si loo hubiyo in si dowlada federaalka iyo dowlad-goboleedyada si siman ugu qeybsadaan taageerada maaliyadeed.

# Talooyin tixgelin mudan

Ku heshiinta iyo hirgelinta xal laga gaaro arrimahaan la isku khilaafsan yahay waa mid deg deg loogu baahan yahay balse waxa ay u badan tahay in uu waqti qaato. Horumarka ayay u badan tahay in uu noqon doono mid tartiib tartiib ku yimaada. Waxaa muhiim ah dib-usoo-nooleynta Golaha Amniga Qaranka ama dhisidda madal lamid ah oo la isugu keeno hoggaanka siyaasadeed si ay xal ugu helaan arrimaha la xiriira amniga oo qeyb ka ah geedi-socodka ballaaran ee dib-u-heshiisiinta siyaasadeed. Sida ugu wanaagsan waa in madashaas la sharciyeeyo si loo caddeeyo ujeeddada loo dhisay iyo xiriirka ay la leedahay hay'adaha kale, sida wasaaradaha iyo baarlamaanka. Hay'adda noocan oo kale ah waxay u baahan doontaa in lagu xero hay'adaha kale ee heerka farsamo sida Guddiga Isku-dhafka Qaranka ama Guddiga Amniga Qaranka oo siin kara xulashooyin dheeraad ah oo faahfaahsan oo ku saabsan arrimaha khilaafka ka jiro. Hawshani waxay u badan tahay inay wax-ku-ool noqoto marka uu wehliyo khariidad dhameystiran, u diyaargarow howlgalka, iyo qiimeyn si loo helo xog qiimo leh oo ku saabsan awoodda jirta, iyo qeybinta ciidamada amniga iyo xaalada hay'adaha kale ee la xiriira amniga ee qeyb ka noqon kara go'aan qaadashada wadajirka ah.

Wada-hadallada heerka sare ah iyo kuwa farsamada labaduba waxay u baahan doonaan in si taxaddar leh loo kala hormariyo iyadoo la eegayo wada-xaajoodka arrimaha la xiriira sida federaaleynta maaliyadda, maqaamka Muqdisho iyo awood qeybsiga. Waxa kale oo ay u baahan doonaan in ay tixgeliyaan saameynta ay ku yeelan karaan dawlad-goboleedka hadda jira, iyadoo la hubinayo in awood-siinta ciidamada ammaanka ee dowlad-goboleedyada ay gacan ka geystaan xasilloonida dalka. Waa in si deg deg ah isha loogu hayaa arrimaha xasaasiga ah ee ka dhex jira dowlad-goboleedyada oo ay kamid yihiin kuwa u dhexeeya maamulka Jubaland iyo bulshada Gedo, maamulka Hirshabeelle iyo bulshada Hiiraan, maamulka Galmudug iyo Ahlu Sunna Waljamaaca.

Inta uu socdo wadahadalka ku saabsan Naqshadda Amniga Qaranka, waxaa muhiim noqon doonta in la garwaaqsado caqabadaha halkan lagu qeexay, iyo in hannaankan u muuqda in lagu gaari doono horumaro tartiib tartiib ah ay u badan tahay inuu ugu dambeyntii guuleysto. Marka ay suuragal tahay, hes-hiisyadu waxay u baahan doonaan in la qoro, iyadoo loo eegayo sharciyada khuseeya, xiriirna loo sameeyo geeddi-socodka siyaasadda iyo guddiyada baar-lamaanka ee khuseeya. Xaqiijinta lahaanshaha Soomaalida ee geeddi-socodka, iyo ka qeybgalka bulshada guud ahaan arrimaha laga wada-hadlayo waxay sidoo kale muhiim u noqon doontaa xoojinta sharcinimada haykalka amniga ee ka dhasha hannaankan.

## Credits

Faalladan qotada-dheer waxaa soo saaray Somali Dialogue Platform. Somali Dialogue Platform waa barnaamij Soomaalida ka taageera sidii loo gaari lahaa is-afgarad ku saabsan arrimaha la isku haysto ee siyaasadeed waxaana fuliya Machadka Rift Valley. Somali Dialogue Platform waxaa maalgeliya Foreign, Commonwealth and Development Office (FCDO) ee Boqortooyada Ingiriiska, Wasaaradda Arrimaha Dibadda ee Denmark, iyo Hay'adda Mareykanka u Qaabilsan Horumarinta Caalamiga (USAID). Aragtiyada faallada kama turjumayaan siyaasadaha rasmiga ah ee Dowlada UK, Dowlada Denmark ama Dowlada Mareykanka. Platform-ku wuxuu leeyahay madaxbannaanida tifaftirka warbixinnaddiisa oo dhan.

MachadkaRift Valley wuxuu ka shaqeeyaa bariga iyo bartamaha Afrika si uu usoo saaro aqoon maxalli ah oo loo adeegsan karo horumarinta arrimaha bulshada, siyaasadda iyo dhaqaalaha.

Xuquuqda daabacaadda © Machadka Rift Valley 2022.

Warbixintan waxaa la daabacay iyadoo la adeegsanayo Creative Commons Attribution-NonCommercial-NoDerivatives License (CC BY-NC- ND 4.0).